



Is-dhexgalka & Iskuul-doorashada MPS

Sebtembar 2019

Hoggaamin Hufan




Greatness is telling the truth & being courageous in pursuit of justice. The worst thing you could tell young people is to be successful but become well-adjusted to an unjust status quo as opposed to being great & being maladjusted to an unjust status quo.

— *Cornel West* —

AZ QUOTES

Waxyaabahaan Qiimeyno



Mabaadii' kala-duwan

Qaadashada kan ugu muhiimsan

Dibu-qeybsi hantiyeed

Waxhelid caddaalad ah


Sinnaan la'aantu keliya in ay qiil u tahay kordhinta cayr-qaadashada dadka danyarta

Caddaaladdu waa xaqsoorid

Caddaaladdu waa xorriyad

Joojinta habka sinnaan la'aanta ah

Kala-doorasho iyo wax wareejiin si ikhtiyaar ah



Qofna si sahlan hanti uma sii wareejiyo

Waxyaabihii Muhiimka u ahaa Kala-doorashada iyo Is-dhexgalka

1954 Brown Vs. Guddiga Waxbarashada

1964 Sharcigii Xuquuqda Madaniga

1968 Green Vs. Guddiga Iskuullada Degmada ee New Kent County

1969 Swann Vs. Charlotte –Mecklenburg

1972 Earl Larson wuxuu si adag ugu dhawaaqay in iskuulada Minneapolis ay khasab ku ahayd inay is-dhexgalaan ka dib markuu go'aansaday in Minneapolis ay "si ula kac ah" iyo "kas cad" ardeyda u kala soocday (11,000 oo arday ayaa bas lagu qaaday)

1983 Garsoore Larson ayaa Minneapolis ka celiyey Kormeeridda Federaalka. MDE waxay ku khasbanaatay hoggaankii is-dhexgelidda

1988 Sharciga Is-diiwaangelinta Furan

1990-2000 Ardeyda qowmiyadaha tirada yar iyo wixii ay ku heleen Bilaash ama Qiima-dhimis ayaa is-diiwangelintii 43 boqolkii u beddeshay 66

1995 Dacwaddii NAACP

1999 Xeerarka kala-soocid la'aanta ee MDE: Barnaamij ah bilaabidda dhaqaalaha is-dhexgalka iyo Kala-doorashada Dadka ayey jirtaa (ardeydii basas ayaa loogu qaaday meelo ka baxsan magaalada oo ay ku yaallaan iskuullo)

2003 Afartan iyo lix boqolkiiba Iskuullada Minneapolis ayaa soo sheegay ururro arday oo ah boqolkiiba 81 ilaa boqol 100 oo aan caddaan ahayn

2007 Isirku ma noqon karto qodobka keliya ee ardeyda loogu meeleeyo iskuullada. Maamullada iskuullada waxay sii wadan karaan dedaalka ikhtiyaarkooda ah oo ay ku jiraan iskuulka oo la dooran karo iyo barnaamijyada ardeyda maskaxda badan ama magnet programs

2015 Cruz- Guzman vs Gobolka Minnesota oo dooddu waxay ahayd in gobolku u suurta geliyey kala-soocid midab ku saleysan agagaarka degmada toddobaad oo waxa ay oggolaadeen iskuullada la yiraahdo charter in ay hal qowmiyad dhigan karto iyo in qoysaska loo oggolaaday in ay iska diiwaan geliyaan meelo ka baxsan iskuullada deegaankooda iyo degmooyinkooda

Dulmarid Guud: Xaaladda Hadda


- Iyadoo la tixgelinayo dhibaato dalka oo dhan ka jirta oo ah waxbarashadda magaalooyinka, MPS waxay wajahaysaa caqabado waaweyn oo ah gudaha iyo dibadda si loo beddelo loona tayeeyo waxbarashada ardeyda oo dhan, gaar ahaan ardeyda aan taariikh ahaan si fiican wax loo bari jirin.
- Asalkii horeba dhibku wuxuu ka yimid kala-soocidda iskuullada oo ay sabab ahayd kala-soocidda dadweynaha, iyo sidoo kale heerarka kala-doorashada ee qoysasku ku haysteen degmada gudaheeda iyo dibaddeeda. In laga qeyb qaato habka kala-doorashada lafteedu ma ahayn mid loo siman yahay oo waxaa saameyn ku lahaa isirka, dakhliga iyo sida qoysku uga warhayo. Taasi waxay keentay saboolnimo baahsan iyo waxbarashada ardeyda oo aan isla'ekeyn.
- Intaas waxaa sii dheer, farqi weyn ayaaba la iska rumeystay, macallin iyo ardayba, in la iska filan karo hoos u dhaca xirfadaha bulshada iyo dareenka ee ilmaha qaarkood.

Dulmarid Guud: Xaaladda Hadda

- Caqabadahaas waxaa ka sii daray nidaamyo joogto ka dhigay deggenaansho la'aan iyo in ay liidato tayada shaqaalaha iskuullada baahidoodu badan tahay.
- Barnaamijyada tababarka macallimiinta si joogto ah macallimiinta uguma tababaraan caqabadaha ka jira MPS oo macallimiinta la heli karo intooda badan waa caddaan.
- Macallimiinta waayo-aragnimada leh waxay u badan tahay inay aadaan iskuullada dadka maalqabeenka ah, iyagoo cidleynaya iskuulladii aadka ugu baahnaa oo waxaa kala sii wareega bareyaal aan khibrad u lahayn.
- MPS dalka oo dhan ayey ku hoggamineysaa in si daah-furnaan ah looga hadlo arrimahaas, iyadoo ay ku jirto adeegsiga habraac gebi ahaan naqshadeysan.

Saameynta Habka Isu-geynta Caqabadaha

MAGAALADA, GOBOLKA, & DEGMADA




DEGMOOYINKA & TABABARKA MACALLIMIINTA




Farqiga Guulgaarista Ardeyda Minneapolis

Inta badan ardeyda caddaanka ah ee MPS wax-akhriskoodu wuxuu gaaraa heerkaa laga rabay, laakiin ardeyda qowmiyadaha tirada yar heerkoodu ma gaaro.




Waa maxay Xiriirka ka Dhexeeya
Isirka, Dakhliga iyo Guulgaarista?

Xiriirka ka dhexeeya Isirka iyo Dakhliga




MPS K-8 SCHOOLS (FRL FIRST QUARTILE) - PCT PROFICIENT 2018

MCA-III READING by PCT FRL




MPS K-8 SCHOOLS (FRL SECOND QUARTILE) - PCT PROFICIENT 2018

MCA-III READING by PCT FRL




MPS K-8 SCHOOLS (FRL THIRD QUARTILE) - PCT PROFICIENT 2018

MCA-III READING by PCT FRL




MPS K-8 SCHOOLS (FRL FOURTH QUARTILE) - PCT PROFICIENT 2018


MCA-III READING by PCT FRL




MCA-III READING GROWTH: FIRST QUARTILE FRL PCT




MCA-III READING GROWTH: SECOND QUARTILE FRL PCT




MCA-III READING GROWTH: THIRD QUARTILE FRL PCT




MCA-III READING GROWTH: FRL PCT




K-8 FIRST QUARTILE FRL - AT OR ABOVE 90% AVG DAILY ATTENDANCE




K-8 SECOND QUARTILE FRL - AT OR ABOVE 90% AVG DAILY ATTENDANCE



K-8 THIRD QUARTILE FRL - AT OR ABOVE 90% AVG DAILY ATTENDANCE



K-8 FOURTH QUARTILE FRL - AT OR ABOVE 90% AVG DAILY ATTENDANCE




Caqabadaha jira

Dadweynaha Kala-soocan	Kala-soocidda guryaha iyo kala-doorashada ayaa gacan ka geystey saboolnimada oo meelo ku bata iyo meelo ay guul-gaaristoodu hooseyso. Natiijada kama dambeysta ah waa guusha loo saadaalin karo isir ahaan iyo dakhli ahaan.
Is-qorista Furan	Kala-doorashada ayaa si aan ula kac ahayn qeyb uga ah waxa ay waalidku ka cararayaan ee ah saboolnimada ka sii dareysa isir ahaan iyo dhaqaale ahaan. Markuu hal ardey iskuulka billaabo, kala-doorashada awgeed MPS waxaa ka sii taga 22 arday.
Is-dhexgalinta Iskuullada Ardeyda Maskaxda Badan ama Magnet	Inkastoo barnaamijyada la yiraahdo Magnet ay kor u qaadi karaan is-dhexgalidda, ma jirin wax natiijo la taaban karo oo ka soo baxday tabtii Iskuullada MPS Magnet.
Rumeysnaanta Kala-duwanaan Aqooneed	Iyadoo loo qeexay sida joogtada ah iyo kala-qeybsanaanta qotada dheer ee u dhaxeysa waxa waalidku rumeysan yihiin in carruurtoodu awood u leedahay iyo waxa ay shaqaalaha MPS rumeysan yihiin in ay carruurtu sameyn karto.
Tababaridda & Kala-duwanaanshaha Macallimiinta	Waxaan is-qaadan karin tirada macallimiinta rabta takhasusaadka shatiga waxbarista iyo baahida shaqaaleynta (tusaale, daraasaadka bulshada marka loo barbardhigo waxbarashada gaarka ah). Siday u badan yihiin macallimiinta cusub waa caddaan oo waxaa yar macallimiinta qowmiyadaha tirada yar, gaar ahaan meelaha adag in la buuxiyo. MPS waxaa sidoo kale ka dhacday inaysan si isku mid ah u tababarin macallimiinta cusub.
Waxbarashada Tayada leh oo aan si Gaar Ahaaneed Looga Sinneyn	Macallimiinta MPS waxay u muuqdaan inay u guuraan iskuullo saboolnimadu ku yar tahay inta ay xirfaddooda ku jiraan oo dhan iyagoo u maraya wareysi iyo hab xulasho ah. Tani waxay abuureysaa is-beddel jagooyin ka bannaan iskuulada baahidoodu sarreyso oo siday u badan tahay ay yimaadaan macallimiin cusub ama waaya-aragnimadoodu yar tahay.


Dadweynaha Kala-soocan

Isirka/Qowmiyadda Bulsho Kasta

Boqolleey ahaan ardeyda sheegata
Mareykanka Madow




Boqolleey ahaan ardeyda sheegata
Caddaanka Mareykanka




Dakhliga iyo Luuqada Bulsha Kasta

Boqollee ahaan ardeyda xaqa u yeelata Qado ah Bilaash & Qiimo-dhimis (FRL)



Boqollee ahaan ardeyda baraneysa afka Ingiriiska



Buluugga madow wuxuu matalaa saamiga ugu sarreeya

Kala-doorashada MPS: Iskuullada Ardeyda Maskaxda Badan iyo Takhasuska

Xaaladda Isdhexgalka iyo Kala-doorashada ee hadda ka jirta MPS

- Kala-soocidda guryaha iyo kala-doorashada ayaa gacan ka geystey saboolnimada oo meelo ku bata iyo meelo ay guul-gaaristoodu hooseyso.
- Kala-doorashada ayaa si aan ula kac ahayn qeyb uga ah waxa ay waalidku ka cararayaan ee ah saboolnimada ka sii dareysa isir ahaan iyo dhaqaale ahaan
- MPS sannad kasta waxaa ka sii taga 5,000 oo arday oo iska diiwaangeliya degmooyinka kale
- MPS waxaa ka sii taga 5,000 oo kale oo arday oo iskuullo charter ah ku biira
- Is-diiwaangelinta ugu hooseysa waxay ka jirtaa xuduudaha waqooyiga ee degmada

Saameynta Kala-doorashada Iskuullada

Markuu hal ardey iskuulka
billaabo, kala-doorashada
awgeed MPS waxaa ka sii taga
22 arday

Dupuy, B., & Webster, M. (2017, 24-kii Sebtembar). Kala-doorashada Iskuullada waxay Magaalooyinka Mataanaha ka dhigtaa inay meelo wax helaan, meelana aysan waxba helin. Raadraac <http://www.startribune.com/school-choice-splits-twin-cities-suburbs-into-haves->


[have-nots/447378683/](http://www.startribune.com/school-choice-splits-twin-cities-suburbs-into-haves-)

20

School choice net winners and losers


Some Twin Cities school districts gain more students than they lose through school choice or lose more than they gain.

■ Students gained per each student lost ■ Students lost per each student gained



Source: Star Tribune analysis of Minnesota Department of Education data • Created with Datawrapper

Is-diiwaangelinta Hooseysa Xuduudaha Waqooyiga




Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis Saamigooda Ardeyda


- Saamiga ardeyda si joogto ah isaga diiwaangelisa iskuul ah charter waxay noqdeen isir ahaan
- MPS waxa u soo haray saamiga ugu hooseeya ee Waqooyiga iyo Waqooyi-bari (oo inta u dhexeeya 40% ilaa 60%) ardeyda ku nool meelahaas ayaa aadda iskuullada MPS)
- Saamigu wuxuu ugu sarreeyaa Koonfurta Minneapolis, oowaa qeybta caddaanka iyo ardeyda maalqabeenka (in ka badan 75%)

Goobaha Iskuulka la Yiraahdo Magnet

Hadda iyo Iskuullada la Yiraahdo Magnet




Hadda Iskuulada Takhasuska ah



Iskuulada la Yiraahdo Magnet

Ku dhawaad seddex-meelood meel iskuullada la yiraahdo MPS Magnet ardeyda qowmiyadaha tirada yar ee ka tagay 2013 illaa 2017, ardeyda kalena si isku tiro ah uguma soo biireyn ama waa ay yaraayeen.



MPS Iskuullada Magnet ka - Isbedelka Ardayda ee Boqolleey ahaan Midab ku muujisan 2013 ilaa 2017

Isbeddellada Dadka Muddo Dabadeed

	SY 2015			SY2016			SY2017			SY2018		
	N	SOC	FRL	N	SOC	FRL	N	SOC	FRL	N	SOC	FRL
Bethune	314	95%	97%	346	94%	98%	325	93%	95%	336	93%	92%
Jenny Lind	528	90%	93%	484	96%	93%	451	97%	91%	438	96%	88%
Pillsbury	605	85%	87%	534	82%	82%	420	83%	83%	393	84%	78%
Sheridan	500	85%	91%	458	90%	88%	406	89%	92%	387	88%	85%
Folwell Arts Magnet	890	86%	85%	870	88%	85%	867	87%	90%	877	89%	85%
Jefferson	751	94%	97%	724	95%	96%	661	96%	91%	567	95%	89%
Anderson United	1291	96%	95%	1245	96%	96%	1086	96%	97%	984	97%	93%
Sullivan	754	95%	89%	754	96%	96%	737	96%	92%	677	95%	86%
Anishinabe	320	98%	95%	310	98%	97%	290	98%	94%	236	98%	93%
Bryn Mawr	491	85%	85%	473	84%	84%	466	87%	83%	413	91%	83%
Green Central Park	550	93%	97%	361	92%	97%	366	95%	96%	347	95%	91%
Lucy Laney	637	98%	98%	481	94%	97%	472	97%	90%	458	97%	87%
Hall	430	91%	90%	378	91%	90%	319	93%	91%	259	94%	94%
Nellie Stone Johnson	777	96%	92%	557	95%	96%	500	95%	95%	443	97%	96%
Hmong International Academy	588	97%	91%	587	97%	89%	589	98%	86%	562	98%	87%
Anwatin	613	87%	82%	614	88%	81%	557	86%	78%	565	87%	72%
Dixon Middle	287	94%	94%	282	94%	94%	321	90%	87%	355	89%	87%
MPS Grades K-8 Total	26680	66%	64%	26442	65%	64%	26099	65%	62%	25589	64%	59%

All figures reflect active enrollment in Discovery at the End of each Academic Year

Rumeysnaanta Kala-duwanaan Aqooneed

Rumeysnaanta Kala-duwanaan Aqooneed

Iyadoo loo qeexay sida joogtada ah iyo kala-qeybsanaanta qotada dheer ee u dhaxeysa waxa waalidku rumeysan yihiin in carruurtoodu awood u leedahay iyo waxa ay shaqaalaha MPS rumeysan yihiin in ay carruurtu sameyn karto. Carruurtu waa ay ka soo baxaan ama ku fashilmaan waxyaabaha laga filayo ee ay dad kale u dejiyaan.


- Meelo Hoosudhac ah
- Meelo Sarreeya
- Eex cad ama daahsoon: Kala-duwanaanshaha isirka (casaanka iyo buluug) garaaf ayaa ku muujisan
- Qiyaasid badan ama mid yar oo ah isir ahaan xirfadaha dareenka bulshada

Fikradaha Is-Maamulidda

How do perceptions about Self-Management vary across stakeholder groups for White students?

This chart presents student and teacher responses to the 2019 Civil-Check Items. The chart below displays the percentage of White students who were identified by each of the respondents (i.e., the student themselves or the student's teacher) that they engaged in the skill on the Most Days or Every Day.


PERCENT RESPONDING MOST DAYS OR EVERY DAY BY STAKEHOLDER GROUP FOR WHITE STUDENTS' SELF-MANAGEMENT



How do perceptions about Self-Management vary across stakeholder groups for African American students?

This chart presents student and teacher responses to the 2019 Civil-Check Items. The chart below displays the percentage of African American students who were identified by each of the respondents (i.e., the student themselves or the student's teacher) that they engaged in the skill on the Most Days or Every Day.

PERCENT RESPONDING MOST DAYS OR EVERY DAY BY STAKEHOLDER GROUP FOR AFRICAN AMERICAN STUDENTS' SELF-MANAGEMENT



Tababaridda Macallimiinta

Tababaridda Macalinka: Caqabado

Caqabadaha helidda macallimiinta cusub ee la filanan karo oo sarreysa:

- o Kharashyada waxbarashada
- o Mushaar la'aanta marka macallin arday ah uu wax dhigayo
- o Shuruudaha tacliinta baraha oo aan la xiriirin waxqabadka macallinka laakiin badanaa ay ka rabaan goobaha tababarka ee la citiraafsan yahay

Waxaa jirta **is-qaadasho la'aan ah tirada macallimiinta rabta takhasusaadka shatiga waxbarista iyo baahida shaqaaleynta** (tusaale, daraasaadka bulshada marka loo barbardhigo waxbarashada gaarka ah).

Siday u badan yihiin macallimiinta cusub waa caddaan oo waxaa **yar macallimiinta qowmiyadaha tirada yar** , gaar ahaan meelaha adag in la buuxiyo.

Tababaridda Macalinka: Caqabado

Macallimiinta cusub siday u badan tahay **uma diyaarsana in ay wax baraan iskuullada MPS.**


Meelaha muhiimka ah ee walaacyada ay sheegaan maamulayaasha, la-taliyayaasha macallimiinta cusub, iyo macallimiinta cusub waxaa ka mid ah:

- Inaysan jirin xeelado waxtar leh oo fasalka lagula macaamilo
- Tababarid yar oo ah falceliska waxbarista dhaqan-ahaan habboon iyo sinnaanta gaarka ah ee isirka
- Tababarid yar oo ah waxyaabaha aasaasiga ah iyo culuunta maskaxda ee la xiriirta waxbarista akhris-qorista ah

Kala-duwanaanta Qowmiyadaha Macallimiinta

Caqabad Kala-duwanaanta Qowmiyadaha Macallimiinta

Macallimiinta wax ka dhiga MPS ma matelaan kala-duwanaanshaha qowmiyadaha isirka ee ardeyda.



Kala-duwanaanta Qowmiyadaha Macallimiinta

Kordhinta isirka, luuqadaha, dhaqan-dhaqaalaha iyo jinsiga qowmiyadaha kala-duwan waxay **saameyn wanaagsan** ku yeelataa ardeyda oo dhan iyadoo kordhineysa:

- Ka-qeybgalka ardeyda
- Guusha ardeyda
- Ka-bixidda Dugsiga Sare
- Bilaabidda kuleejyada

Tani waa mid saameynteedu muuqato markay macallinka iyo ardeyda qaar wadaagaan aqoonsi shakhsi ah

Kala-duwanaanta Qowmiyadaha Macallimiinta


Daraasado dhawaan soo baxay:

- Ardeyda danyarta ah, ee wiilasha madow ee uu soo maray hal macallin oo madow 3-aad ilaa 5-aad^{koodii} waxaa hoos u dhac in ay dugsiga sare ka haraan 39% iyo sarakicid 29% in ay rabaan kuleej 4-sano ah.
- Macallimiinta madow uma badna sida macallimiinta caddaanka ah inay habdhaqanka ardeyda Madow u arkaan carqalad

Caqabad Kala-duwanaanta Qowmiyadaha Macallimiinta


MPS waxay kordhisay macallimiinta qowmiyadaha tirada yar oo waxbarashadii ayaa soo hagaagtay

Teacher Workforce Diversity



Caqabadaha Kala-duwanaanta Qowmiyadaha Macallimiinta

Haddii aysan xaalka waxba is beddelin, oo aan heerka shaqaaleynta la hagaajin, waxa dhici doona waa isbeddelo kooban oo ah dhinaca macallimiinta qowmiyadaha kala-duwan.



Waxtarka & Aafada Macallimiinta

Waxtarka iyo Aafada Macallimiinta

Cilmi-baaris ayaa lagu ogaaday:

Macallinku waa waxa ugu muhiimsan ee saameyn ku yeesha waxbarashada ardeyda, oo weliba cawaaqibka macallinku waa mid aan ka harin waxbarashada ardeyda:

- Haddii ay ardeydu haystaan macallin waxtar u leh hal sano ah, waxaa dhacda in ay faa'iidooyinkaas ardeyda ka sii muuqato sannado badan
- Saameynta xun ee macallinka aan waxtarka u lahayn guusha ardeyda waxay sii jireysaa ilaa saddex sano in ka sii badan intii macallinka waxtarka leh
- Ardeyda liidata waxay u badan tahay in ay dhigtaan fasallo ay macallimiinta wax ka dhigta aad u liidato


Waxtarka iyo Aafada Macallimiinta

Iskuullada ay boqolley ahaan ku badan yihiin ardeyda qowmiyadaha tirada yar, ardeyda xaq u yeelata qado ah bilaash/qiimo-dhimis, iyo ardeyda uusan wax-akhriskoodu fiicneyn waxay u badan yihiin in ay ka jirto:

- Beddelaadda macallimiinta oo aad ugu badan
- Tirada shaqaale badan oo goor dambe la qoro
- Macallimiin ay khibraddoodu yar tahay
- Macallimiin badan oo la isaga qoro


Waxtarka iyo Aafada Macallimiinta

Iskuullada MPS ee ay boqolleey ahaan dhigtaan in badan oo ah ardeyda xaqa u yeelata qado ah bilaash ama qiima-dhimis ayaa badanaa lagu arkaa heerarka macalimiin taya-ahaan hoos




Waxtarka iyo Aafada Macallimiinta

Codsiga macallimiinta waxtarka leh ee MPS ayaa hoos u dhaca marka ay iskuulada ku soo kordhaan % ardeyda qowmiyadaha tirada yar, qado ah bilaash ama qiima-dhimis, iyo aq





Waxtarka iyo Aafada Macallimiinta

Wadarta codsiga macallimiinta waxtarka leh ee MPS ayaa hoos u dhacda marka ay iskuulada ku soo kordhaan % ardeyda qowmiyadaha tirada yar, qado ah bilaash ama aiiima-dhimis. iyo aqoonxumo hoosevsa.




Waxtarka iyo Aafada Macallimiinta

Codsiga macallimiinta khibrada leh ee MPS ayaa hoos u dhaca marka ay iskuulada ku soo kordhayaan % ardeyda qowmiyadaha tirada yar, qado ah bilaash ama qiima-dhimis, iyo aqoonxumo hooseysa.



Waxtarka iyo Aafada Macallimiinta


Khibradda macallimiinta waxtarka leh ee MPS ayaa hoos u dhacda marka ay iskuulada ku soo kordhaan % ardeyda oo xaq u yeesha qado ah bilaash ama qiima-dhimis.



Waxtarka iyo Aafada Macallimiinta

Waxbarashada ardeyda celcelis ahaan waxay kordhaa markay sannadaha heerka dhexe ee khibradda macallinku ku sii korodho iskuulka.

Student growth predicted by teacher experience



Waxtarka iyo Aafada Macallimiinta

Iyadoo loo maray Habka Xulashada iyo Wareysiga:

- Qeyb ahaan, macallimiintu waa ay ka beddeshaan iskuullada ay ku adag tahay helidda shaqaalaha iyo iskuulada lagu sheego inay u baahan yihiin Taageerid Guud, Taageerid Gaar Ahaaneed, ama Taageeridda Waaxda Waxbarashada MN, la-xisaabtamid lagu magacaabo North Star accountability system.
- Celcelis ahaan, macallimiin khibrad badan leh waxay aadaan iskuullada ay ku yar yihiin ardeyda qowmiyadaha tirada yar, ardeyda la siiyo qado ah bilaash/qiimo-dhimis, iyo ardeyda aan ku fiicnayn waxbarashada.
- Celcelis ahaan, maamuleyaasha shaqaaleynta waxay macallimiin badan ka soo helaan meelaha ay ku nool yihiin ardeyda qowmiyadaha tirada yar, ardeyda la siiyo qado ah bilaash/qiimo-dhimis, iyo ardeyda aan ku fiicnayn waxbarashada.

Waxtarka iyo Aafada Macallimiinta

Aafada sinnaanta gaar ahaaneed ee macallimiinta degmada, sidaas oo kale ayey iskuulladana uga jirtaa. Celcelis ahaan, ardeyda MPS ee qormiyadaha tirada yar waxaa wax bara macallimiin ay yar tahay khibraddooda iyo waxtarkooda.

Isbeddelladan ayaa sidoo kale ka dhex muuqda:

- Iskuullada la isla doonto ardeyda iyo macallinka
- Iskuullada ay macallimiintoodu dhigto koorsooyin waxbarasho oo ah heer kuleej (AP, IB, maadooyin aqoon guud) iyo ardeyda heli kara koorsooyinkaas iyo macallimiintii u dhigeysay

Macallimiintu meeshay dooranayaan iyagaa xukuma oo waa ikhtiyaarkooda. Warbixn qoto dheer ayaa laga sameyn doonaa oo waaba qeyb ka mid ah Qorshaha Sinnaanta Gaar Ahaaneed ee MPS, taasoo ah shuruud sharciga Shaqaalaha Adduunka ugu Fiican iyo ESSA.

Tallaabooyinka La Qaadayo

Tallaabooyinka La Qaadayo

Dadweynaha Kala-soocan	<ul style="list-style-type: none">• Yareynta saboolnimada badan ee iskuullada hooseeya 80% meelaha uu ka jiro baratakoolka gudaha ee wax loogu hagaajinayo iyadoo la xaddidayo is-diiwaangelinta ka baxsan degmada. Taageeridda qaabka dadweynaha isdhexgala iyo iskaashiga barnaamijka hirgelinta guryaha qiimaha-jaban ee Magaalada Minneapolis
Is-qorista Furan	<ul style="list-style-type: none">• Adeegsiga iskuulada takhasuska ah si la kordhiyo maalgelinta dadweynaha ee waxbarasho mawduuc ku socota iyadoo laga hortagayo in loo kala hormaro isir ahaan iyo dhaqaale ahaan
Natijjooyinka Iskuullada la yiraahdo Magnet	<ul style="list-style-type: none">• Maamulidda hal meel ee iskuullada magnet ka iyadoo loo helayo maalgelin dheeraad ah baahidooda, yaraantooda, iyo fududeyntooda
Rumeysnaanta Kala-duwanaan Aqooneed	<ul style="list-style-type: none">• Shaqaaleynta tababarayaal sinnaan gaar ahaaneed iyo hirgelinta Manhaj aan eex ku jirin• Sameyna aqoon-kororsi dheeraad ah oo la joogteeyo iyadoo loo cabbirayo siday isugu xigxigaan oo ah tayada laga rabo• Wada-xiriiridda ugu fiican oo la caadeysto iyo guulo isku mid ah iskuullada isku midka ah (Diyaarsanaan)
Kala-duwanaanshaha qowmiyadaha macallimiinta & Tayada	<ul style="list-style-type: none">• Sii-wadidda iyo sahaminta qaabab cusub oo la xaqiijiyay oo wax lagu baro macallimiinta• Xoojinta iskaashiga MPS iyo is-waafajinta diyaarsanaanta macallimiinta
Kala-qeybsanaanta Waxbarista Tayeysan ee aan Loo Sinneyn	<ul style="list-style-type: none">• Ka-wadahadlidda heshiiska, taasoo ay ku jirto soo-jeedin lagu xaddido wareysiga iyo xulasho oo hal wareeg laga dhigo si loo yareeyo beddelidda bareyaasha• Sameynta iyo bilaabidda Qorshaha Sinaanta Gaar Ahaaneed ee Macallimiinta



Tallaabooyinka La Qaadayo

Si wax looga qabto caqabadahaas oo dhan, MPS waxaa ka go'an adeegsiga waxyaabaha hoos ku qoran si loo abuuro qorsheyaal la fulin karo inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka 2019-20 iyo wixii ka dambeeya.

Naqshadeyn Degmo oo Buuxda	<ul style="list-style-type: none">● Baratakoollada meelaynta iyo daraasadeynta xuduudaha● Hab u gaar ah iskuullada la yiraahdo Magnet● Saadaalinta Shaqaalaha
Shaqaalaha ugu Fiican Adduunka/ Qorshaha Sinnaanta Gaar Ahaaneed ee Macallimiinta	<ul style="list-style-type: none">● Baaritaanka macallimiinta iskuulada ay wax ka dhigaan, sida ardeyda loogu meeleeyo macallimiinta iskuulladooda (jadwalka) iyo sida ardeyda lagu meeleeyo iskuullada● La-xiriiridda dadka ay dantu ugu jirto, gaar ahaan macallimiinta iyo maamuleyaasha ku jira sameynta Qorshaha Sinnaanta Gaar Ahaaneed ee Macallimiinta
Luuqadda Heshiiska	<ul style="list-style-type: none">● Aqoonsiga iyo ka wada-hadalidda luuqadda heshiiska si loo dhiirigeliyo yareynta beddelaadda bareyaasha iyo qeybinta sinnaan gaar ahaaneed oo ah waxbaris tayadeedu sarreyso
Habka EDIA	<ul style="list-style-type: none">● Aqoonsi lagu horumariyo habka meelaynta ardeyda iyo dib-u-eegidda xeerarka degmada ee horseedka u ah sinnaan la'aanta gaar ahaaneed
Qaab-dhismeed Maalgelin	<ul style="list-style-type: none">● Isbeddelka shaqaalaha● Maalgelinta tacliinta oo wax laga beddelo si wax looga qabto sinnaan la'aanta gaar ahaaneed● Qorsheyn ah is-dhexgalid si loo aqoonsado baahiyaha

